

COVID-19

Adeegga Dhakhtarka Fogaanmaqalka

(COVID-19 Treatment Telehealth Service)

Ma isku aragtay calaamadaha COVID-19?

Dhammaan dadka ku nool Wisconsin ee ka weyn 18 jir waxay bilaash ku helayaan talabixinta COVID-19 oo ah fogaanmaqal iyo in daawo loo qoro.

- Dhakhtar ayaa xaalkaaga qiimeyn doona oo waxaa laga yaabaa in uu kuu qoro kaniin fiican oo faayruska loo qaato sida Paxlovid.
- Ha ka daahin. Xataa haddii ay calaamadahaagu fudud yihiin, isla markiiba dhakhtar raadso. Daawada faayruska ee COVID-19 waa mid fiican oo waxa ay dadku ka maarmeen in isbitaal loo seexiyo ama in ay u dhintaan COVID-19.
- **Samee waxyaabaha hoos ku qoran.**



1. Naftaadi Diyaari

- **Waa in aad haysato** liiska daawooyinka, fiitamiinka, ama wixii daawo la mid ah oo aad qaadato
- Haddii kelyaha lagaa hayo, soo qaado koobbi sheybaar oo ah natiijooyinkaagii 3dii bilood ee ugu dambeeyey haddii



2. Register

- **Guji:** color.com/covid-19-treatment-wi
- **Soo garaac:** 833-273-6330
- ama **Sawiro:**



3. Ku-xirnow

Ka soo qeybgal ballanta fiidyowga ama taleefanka si aad dhakhtar ula hadasho **ilaa 30 daqiiqo**



4. Wax kale

Haddii lagu qoro daawada faayruska, ka soo qaado farmashiyaha xaafaddaada ama hal habeen ka dib si toos ah ha laguugu soo diro gurigaaga

Caawimaad kale?

Dhakhtar ayaa diyaar ah maalin kasta 8da aroornimo ilaa 8da fiidnimo CT.

Adeeggan waxaa nala sameynaya Color Health, Inc. Haddii aad u baahan tahay caawimaad, kala xiriir kooxda Color Support Team 844-352-6567 ama farriin ugu soo dir treatments@color.com 8da aroornimo ilaa 7da fiidnimo CT.

Faahfaahin ka eego barnaamijka fogaanmaqalka Telehealth ee DHS COVID-19:

dhs.wisconsin.gov/covid-19/telehealth.htm

Ogow: fogaanmaqalka Telehealth waa habka daaweynta COVID-19 oo keliya, ee ma aha daaweyn kale, ama xaaladaha degdegga ah ee caafimaadka. Haddii ay kugu dhacdo xaalad caafimaad oo ah degdeg, fadlan garaac 911.

Daaweyntan baddiil uma aha tallaalka, sababtoo ah tallaalka waxaa looga hortagaa xanuun, isbitaal in la seexdo, iyo dhimashada. Faahfaahin ka eego [qaadashada tallaalka](#).

